Qoraalkan Warbixintan waxaa loogu talo galay qaxootiga raba in reerkooda lagu mideeyo ama sii codsaday oo sugaaya go'aanka IND.

VWN wey joojineysaa caawinaada codsiga mideynta qoyska ee xerada dejint dhexdeeda

Mideynta qoyska waa tallaabo muhiim ah oo ka dib markaad Nederlaan imaado. Laga bilaabo 1 disambar 2025 nasiib daro ma sii bixin karaan hagista codsiyada cusub ee mideynta qoyska VluchtelingenWerk Nederland (VWN). Wasaaradda magangelyada iyo Socdaalka ma siin doonto VWN lacagta ay hagistan xerada dhexdeeda ku sameeyaan. Taariikhdaa laga bilaabo waa inaad iskaaga u weydiisataa haddii aad rabto in xubnaha reerka Nederlaan laguu keeno. Waxa keliya ay VWN ku caawini kartaa haddii aad codsigaaga la gudbiyey 1 disambar ka hor. Waxaan fahamsanahay in tani ay adiga iyo kuwo kale oo badan ku noqon karto war adag. Hoos waxaan ku sharaxeynaa halka aad ka heli karto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida ugu wanaagsan ee aad si madax-bannaan u codsan karto mideynta qoyska. Iyo waxa aad fiiro gaar ah u yeelan lahayd.

1. **Xagee ka heli karaa macluumaad ku saabsan mideynta qoyska?**
   Mideynta qoyska waxaad codsan kartaa ka dib markaad hesho go'aan togan oo ka yimid IND ku saabsan codsigaaga magangalyada. Marka aad hesho, waxaad leedahay sharci muddo ah oo deganaansho magangalyada. Ka hor intaadan gudbin codsiga mideynta qoyska, waxaa muhiim ah inaad marka hore raadiso macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mideynta qoyska. Sidaas ayaad ku heli doontaa waxa shuruudaha ay yihiin iyo dokumentiyada (adiga iyo xubnaha qoyskaaga) ee lagama maarmaanka ah. Tan samee sida ugu dhaqsaha badan, sababtoo ah waxaa laga yaabaa inay waqti qaadato in dokumentiyada loo soo diro Nederland.

- Waxaa websaaytka IND ee mideynta qoyskaka heleysaa warbixin ku saabsan sida mideynta qoyska u hawl galo af Nederlaan ama Inglishka. Taasi waxaad u aadaa www.ind.nl/nareis (Nederlaanka) ama www.ind.nl/family-reunification (Inglishka).
- Waxaa websaaytka VWN ee qaxootiga, www.refugeehelp.nl, ka heleysaa warbixin ku qoran 9 luqadood oo mideynta qoyska ah. Dooro luqada ka dibna 'waxaan heystaa sharci deganaansho 5 sano. Mawduuca 'Gezinshereniging' waxaad ka heleysaa tusaale ahaan qorsho tallaabo tallaabo ah oo codsiga mideynta qoyska.

Fiiro Gaar: waa muhiim inaad codsiga mideynta qoyska ku gudbisaa **3 bilood gudahooda** marka aad sharciga hesho ee IND ee codsigaaga magangelyo. Haddii kale IND wey soo diidi kartaa codsigaaga mideynta qoyska. Maka soo daahday sameynta codsiga? Markaa ku qor codsigaaga sababta aad uga soo daahday: maadaama VWN ay kaa caawin karin codsigaaga.

2. **Sharuudahee ayaa jira oo mideynta qoyska?**

Waxaa websaaytka IND iyo RefugeeHelp ka heleysaa sharuudaha waxa ay yihiin ee codsiga mideynta qoyska. Sharuudaha si joogto ah wax baai ska bedela, markaa si fiican u fiiri websaaytyada. Waxaa jira laba nooc oo codsiga mideynta qoyska ah:

1. Mideynta qoyska ka dib safraaya "Gezinshereniging nareis". Codsiga waa mi daad si isku filnaan u sameyn karto oo waa bilaash. Waxaad codsigan u sameyneysaa lammaanhaaga/xaaska, ilmahaaga da'yarka iyo ilmaha da'weynka ee adiga kugu tiirsan. Haddii aad tahay da'yarka keliga ee magangelyodoonka ee sharciga leh, markaa waxaad u codsan kartaa dib u safarka waalidka ku dhalay. Xubnaha reerka aad codsiga dib u safarka wuu isbedelaa, sidaan hore u sheegnay.

2. Mideynta qoyska oo lagu saleynaayo qodobka 8 EVRM. Codsigan waxaad u sameyneysaa walaalkaaga ama walaashaada markaad qaxootiga da'yarka tahay oo sharciga heysta. Ama qof kale oo reerka ah oo aan lagu sheegin qeybta 1. Codsigani waxaad ku bixineysaa lacag IND 'khidmada codsiga'. Waxaa suura gal ah inaad codsigan (bilaash) caawino ka heli kartaa garyaqaan. Ma u baahan tahay garyaqaan codisga 8 EVRM? VWN ayaa mararka qaar kaa caawin karta garyaqaan. Ka sameyso balan VWN xagga www.refugeehel.nl Haddii aad caawino ka heli weyso garyaqaan, markaa waa inaad codsiga iskaaga u sameysaa oo foom gaar ah (fiiri hoosta). Mideynta qoyska 8 EVRM keliya qoraal ahaan ayaa boostada uga weydiisaneysaa, online-ka ma laha.

3. Sidee ayaa codsiga mideynta qoyska u gudbiyaa?

Waa inaad codsiga ku gudbisaa Nederlaanka ama Inglishka. Tani qaab ayaad u sameyn kartaa:

1. Online-ka. Waraaqaha muhiimka ah, sida koobiyada baasaboorka, waa inaad soo dejin kartaa oo waa raacineysaa. Taasi Nederlaanka waxa loo maraa:
https://eforms.ind.nl/eDienstverlening/formulier/nl-NL/DefaultEnvironment/scNareisAsiel.aspx
Ama inglishka waxa loo maraa:
https://eforms.ind.nl/eDienstverlening/formulier/en-GB/DefaultEnvironment/scNareisAsiel.aspx

2. Boostada.codsiga waad daabacan kartaa, waad buuxineysaa iyo waxaad ku dareysaa nuqulada dokumentiga oo u dir IND.

Foomka luqada Nederlaanka waxa ka heleysaa: https://ind.nl/nl/formulieren/7039.pdf . Codsiga 8 EVRM: https://ind.nl/nl/formulieren/6014.pdf
Foomka luqada Inglishka waxa ka heleysaa: https://ind.nl/en/forms/7539.pdf . Codsiga 8 EVRM: https://ind.nl/en/forms/6514.pdf

Fiiro gaar: Waa muhiim inaad dhamaan nuqulka dokumentiga aad si diiwaan leh ugu dirtaa IND. Cinwaanka wuxuu ku qoran yahay foomka. Waxaad si diiwaan leh ugu diri kartaa PostNL mid adiga kuu dhow. Taasi waa ilaa 12 euro. Waxaad PostNL ka heleysaa https://www.postnl.nl/en/locationfinder/. Waxaa lagu siinayaa cadeyn ah inaad dirtay waraaqaha marka ay helaan waxaad heeysaa xaqiijin in boostadaada ay heshay IND. Markaa waad hubtaa inuu codsigaaga gaaray IND.

Fiiro gaar: dhamaan (nuqullada) dokumentiga aan ku qornayn Nederlaanka, Inglishka, Jarmalka ama Faransiiska, waa in lagu tarjumaa luqada Nederlaanka uuna soo tarjumaan la dhaariyey soo tarjumay. Taasi waxey ku qoran tahay foomka codsiga. Haddii aan la tarjumin markaa IND ma aqrin karto warbixinta ku qoran dokumentiga.

Fiiro gaar: muddo dheer ayey qaadan kartaa ilaa IND codsiga mideynta qoyska ka baaraan degayaan. Hadda waxaa la sugaayaa ilaa 24 bilood. Ma rabtaa inaad ogaato marka ay IND rajeyneyso iney codsigaaga ka baaraan degaan? Taasi waxaad ka heleysaa:https://ind.nl/en/when-will-the-ind-start-with-my-application-for-family-reunification.

4. Sidee ayaan uga jawaabaa warqada IND?

- Ma gudbisay codsigaaga mideynta qoyska ka hor 1 disambar 2025 iyo warqad ma ka heshay IND oo codsigaaga mideynta qoyska ah? Markaa ballan ka sameyso VWN xagga www.refugeehelp.nl wixii caawino ah.
- Ma gudbisay codsigaaga mideynta qoyska ka dib 1 disambar 2025? Markaa waai naad iskaaga uga jawaabtaa warqada IND. Halkan hoose ka aqri sidaad taasi u sameyneyso.

Haddii aad codsigaaga gudbisay, waxaad ka heli doontaa IND xaqiijin helidda codsigaaga. Waxaa ku lifaaqan foom loogu talagalay dirista dukumentiyadaada asalka ah ee baaritaanka dukumentiyada. U dir dukumentiyadaada asalka ah (oo ay weheliyaan nuqullo ka mid ah

dukumentiga iyo turjumaadiisa) foomka buuxiyay adigoo isticmaalaya boostada diiwaangashan ilaa IND. Sidan, IND waxay ku ogaan doontaa cidda loo soo celinayo dukumentiyada asalka ah (nuqullada iyo turjumaadaha) marka la baaro.

Sidoo kale waxaad – waqti dambe – heli kartaa warqad ka socota IND oo sheegaysa in macluumaad kale uu ka maqan yahay. Mararka qaar dukumeenti gaar ah ayaa ka maqan. Waxa kale oo dhici karta inaadan wali si fiican u sharraxin sababta dukumeenti gaar ahi u maqan yahay, ama sida aad isku dayday inaad u hesho dukumeentigaas. Tan waxaa loogu yeeraa 'khalad sixid'.

- Waa muhiim in **4 wiig gudahooda** ka dib markii la helo warqada khalad sixida in laga jawaabaa. Warqada waxaa ku qoran sida aad uga jawaabeyso.
- Isku day inaad sida ugu wanaagsan uga jawaabtaa su'aalaha warqada lagu weydiiyey. Waxaad ku jawaabi kartaa Nederlaanka ama Inglishka.
- Ma kuu suura geli weysey inaad waqtigeeda ku jawaabtaa? Waxaad wacdaa telefoonka nambarkiisa uu warqada, markaasoo IND ku ageysiin karto xaaladaada. Waxaa suura gal ah in waqti dheeraad lagu siiyo.

5. Waxaan helay go'aanka codsigeyga mideynta qoyska. Maxaa layga rabaa inaan sameeyo?

Haddii IND tusaale ahaan ay ka go'aamisey, waxaa jira 3 shey oo suura gal ah:

1. Baaritaan dheeraad
   Waxaa dhici karta in IND ay marka hore rabto inay baaritaan dheeraad ah ku sameyso xaaladdaada. Adiga iyo xubnaha qoyskaaga waa inaad tusaale ahaan dhiig bixinaysaan DNA-gaaga oo aad tagtaa xafiiska IND (adiga) iyo (xubnaha qoyskaaga) safaarada si loogu sameeyo baaritaan DNA. Ama IND waxay kula yeelan kartaa kulan fiidiyow ah adiga iyo/ama xubin ka mid ah qoyskaaga. Warqadda IND waxaad ka heli doontaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida adiga iyo xubnaha qoyskaaga aad ballan ugu samayn kartaan. IND waxay go'aan ka gaari doontaa codsigaaga dib u midoowga qoyska ka dib markii la dhammeeyo baaritaanka dheeraadka ah, sida ku xusan hoos.

2. Go'aan ogolaansho
   Haddii aad go'aan ogolaansho aad hesho, waxaa xubnaha reerkaaga loo oggol yahay iney 'wakiilashada deganaanshaha mudada' (MVV) ay ka soo qaataan safaaradda aad adiga dooratay. Ka dibna waxaa loo ogolaanayaa iney Nederlaan u safraan. Waa muhiim in MVV **waqtiga loogu talo galay** lagu soo qaataa. Go'aanka waxaa qoran inta bilood ay haystaan. Go'aanka IND waxaa kaloo ka heleysaa warbixin dheeraad iyo sidaad ballanta u sameysan karto.

3. Go'aan diidmo
   Haddii aad hesho go'aan diidmo waxaa IND garyaqaan ayaa asagoo ku matalaaya dacwad kuu qaado. Sida ugu dhaqsaha badan ula xariir garyaqaan. Dacwada la qaadanaayaa waa in **4 wiig gudahooda**
   Ka dib markaad go'aanka diidmada hesho ee codsigaaga.

   - Ma gudbisay codsiga mideynta qoyska 1 disambar ka hor oo ma u baahan tahay garyaqaan dacwad kuu qaada, laakiin ma taqaanid sidaad u hesho? Markaa ballan ka samey VWN xagga www.refugeehelp.nl Waa suura gal in VWN ay mid kuu dirto.
   - Ma gudbisay codsiga magangelyo ka dib 1 disambar 2025 ma u baahan tahay garyaqaan dacwad kuu qaada, laakiin ma taqaanid sidaad u hesho? Het Juridisch Loket ayaa garyaqaan kuu diri doona garyaqaan https://www.juridischloket.nl/en/.

6. Maxaan sii diyaarinayaa ka hor inta aan xubnaha qoyskeyga imaadaan Nederland?

Go'aanka togan ee IND waxaad ka heli doontaa macluumaad ku saabsan waxa ay xubnaha qoyskaaga tahay inay sameeyaan marka ay ku soo gaaraan Nederland. Diyaari arrimahaas marka la ogaado taariikhda ay xubnaha qoyska yimayaan. Waxaad magaca iyaga ku

weydiinaysaa hoyga ee Ururka dejinta Qaxootiga (COA), ama – haddii hoy loo baahdo – waxaad ballan ka samaysaa xafiiska IND ee ugu dhow.

Su’aalo

Waxaa la fahmi karaa haddii aad su'aalo ka qabto habka dib-u-midoobidda qoyska. Waxaa laga yaabaa inay lagama maarmaan noqoto inaad codsato dib-u-dhigis. Ama waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad sheegto safaarad kale sababo la xiriira dhibaatooyinka safarka. Waxaa sidoo kale dhici karta xaalad caafimaad oo degdeg ah oo ku saabsan xubnaha qoyskaaga. Haddii aad qabto su'aalo ama wax ka beddelid, la xiriir IND. Laga bilaabo 1-da Disembar 2025 waxaad ka heli doontaa nambar telefoon oo gaar ah. Ee mideynta qoyska ee bogga la xariirka IND: https://ind.nl/en/service-contact/contact-with-ind.